

*Shaqaalaha  
dhaawacan ama  
dhibaneyaasha  
dambiga waxay  
heli karaan  
adeegyada  
turjubaanka*



## Ma u baahan tahay qof ku hadla luqadaada marka aad u timaadid ballanka aad la leedahay takhaatiirta ama bixiyeyaasha shaqada?

### Halkaan waxaad ka heli doontaa sida loo helo turjubaan:

1. Adiga iyo takhtarkaada ama bixiyahaada shaqada ayaa si wadajir ah go'aan uga gaara haddii aad u baahan tahay turjubaan.
2. Ballanka waa in laga bixiyo manaafacaadka aad ka qaadatid L&I ama loo-shaqeeyaha naftiisa-ceymiya.
3. Bixiyahaada ayaa doorta iyo ballamiya turjubaanada laga helo xafiiskooda. Waxaa dhici karto in aad heshid turjubaano kala duwan ballamada kala duwan.

### Yaa kuu tarjumi kara iyo yaa la siin karaa lacag

Nooca turjubaanka	Ma tarjumi karaan?	Ma la siin karaa lacag xagga tarjumada?	Ma u turjumi karaan IME?*
Turjubaanka haysta nambakr xisaabta bixiyaha L&I	Haa.	Haa	Haa
Xubinta qoyska ka weyn 18 sanno	Waa wax dhici kara <sup>+</sup>	Maya.	Maya
Saaxiib ama macaruuf	Waa wax dhici kara <sup>+</sup>	Maya.	Maya
Shaqaalaha kliinikada oo tarjumi kara, balse aan lahayn darajada turjubaanka	Waa wax dhici kara <sup>+</sup>	Maya.	Maya.
Wakiilka sharciga shaqaalaha ama dhibanaha dambiga	Maya.	Maya.	Maya
Wakiilka sharciga loo-shaqeeyaha	Maya	Maya.	Maya.
Dadka ka yar 18 sanno	Maya	Maya.	Maya.

\* IME waa *imtixaan caafimaad madax banaan* ay isku soo dabarideen L&I ama loo-shaqeeyaha naftiisa-ceymiya.

<sup>+</sup> Bixiyaha waa in uu habsado in turjubaanka leeyahay aqoon. Bixiyaha wuxuu xaq u leeyahay in uu isticmaalo aqoonyaanka turjubaanka L&I baddalkii mid aan aqoonyaana ahayn balse uu soo xusho bukaanka.

[sii socda dusha](#) ➔



Washington State Department of  
**Labor & Industries**

Workers' Compensation Services

## **Waxa waajibka ku ah turjubaanada in ay sameyaan waa in ay:**

- U tarjumaan si sax ah iyo si dhamaystiran. (Waa la tarjumi doonaa wax kasta oo la sheego inta uu socdo ballanka, loomana baahna in qofka uu sheego wax uusan rabin in la tarjumo.)
- Xushmayaan asturnaanta macaamilka iyo waa in ay u qaataan in dhamaan macluumaadka yahiin qarsoodi.
- Soo bandhigaan xariir kasta oo saamayn kara, ama u muuqda in uu saameeyo, dhedhexaadnimadooda.
- Si sax ah iyo si dhamaystiran u sharaxaan tababarkooda iyo waayoaragnimadooda haddii la weydiiyo.
- Shaqaalaha ama dhibanaha dambiga iyo takhtarka ama bixiyaha shaqada xasuusiyaan mas'uuliyadaan horaanta ballan kasta.

## **Waxa turjubaanada aysan samayn karin:**

- In la xigsado dhinac inta la tarjumaayo ama la muujiyo eexda shakhsiga ama waxa qofka aaminsan yahay.
- In ay suuq geeyaan adeegyadooda.
- In ay iskudabaridaan ballamo si ay u abuuraan shaqo.
- La xariiraan shaqaalaha ama dhibanaha dambiga marka laga reebo L&I, naftii-ceymiyaha, takhtarka ama bixiyaha shaqada kaa codsadaan in aad sidaas sameysid.
- Bixiyaan gaadiid lagu tago ama looga soo noqdo ballamada takhtarka ama shaqada.
- Ka dalbadaan shaqaalaha ama dhibanaha dambiga in ay isticmaalaan adeegyada turjubaanka oo keliya.
- Ogoladaan in ay lacag ka qaataan qof kasta marka laga reebo L&I ama naftii-ceymiyaha.
- Ka qeybqaataan hawlaha aan ahayn tarjumada.

### **Ma qabtaa su'aalo ama arrimo ku saabsan adeegyada turjubaanka?**

- Su'aalaha guud, kala xariir Maamulahaada Sheegashada.
- Si aad u soo sheegtid khayaano suurtoagal ah, wac telefoonka 360-902-6847 ama telefoonka lacag la'aanta ah 1-888-881-5947, xulashada 4.

*Kaddib marka ay codsadaan, dadka itaalka darran waxay heli karaan kaalmada luqadda shisheeyaha. Wac 1-800-547-8367. Kuwa isticmaala TDD, waca 360-902-5797. L&I waa loo shaqeeye bixiya fursadaha siman.*